
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Darbigii Weynaa ee Nexemyaah

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay


Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Bershiya, waxay ahayd dowlad awood badan, oo adduunka xukunta. Oo Boqor Artaxshast ayaa xukumi jiryay Bershiya. Taana waxay u ahayd isaga inuu yahay xaakin sare. Mid ka mid kuwa caawiya boqorka waxaa ka mid ah nin Yuhuudi ah oo la yirahdo Nxemiyaah. Shaqadiisana waxay ahayd inuu ka dhadhamiyo cuntada boqorka si aan loo sumaynin.




Maalin baa, Nexemyaah jor yimid boqorkii hortiisa isagoo aad wajigiisa u murugeysan yahay. Boqorkii baa damcay inuu ogaado wax ka khaldan. "Boqorow weligaaba noolow," ayuu Nexemyah yidhi. "Bal maxaa wajigaygu u murugeysan waayay, iyadoo meesha ah magaaalada awowyaashay xabaalahoodu ahaayeen ay baaba' tahay oo idaheeda dab lagu gubay." Nexemyaah wuxuu ka hadlayaa Yerusaalem, oo ay dagaalo burburi-yeen sanado badan ka hor.



Boqor Artaxshasta ayaa weyddiiyey, “Maxay tahay waxaad jeceshay?” “Aan aado Yerusaalem si aan dib ugu dhiso iyada,” Ayuu Nexmyah ka codsaday. Boqorkiina wuu ka yeelay si naxariisi kujirto. Oo weliba wuxuu siiyey warqad dowladeed oo isaga ka difaacaysa dhib walba oo uu kala kulmo sodcalkiisa.




Boqorku in bandanna wuu ku sii caawiyey. Wuxuu siiyey Nexemyaah warqad ku socota Aasaaf, kan dhowr dhirta boqorka, si uu u siiyo alwaax oo ahayd sida uu Nexemyaah weyddiistay inuu ku dhiso derbiyada magaalada.



Markii Nexemyaah yimid Yerusaalem, wuxuu isug yeedhay saraakiishii oo ku yidhi, "Inay dhibaato jirto. Magaaladii inay baaba'day oo irdaheedii gubteen. Aannu bilowno inaan dib u dhisno." Wuxuu u sheegay inuu boqor Artaxshasta u soo ogolaaday oo ah qofka ugu muhiimsan dadka oo idil, Ilaah inuu dhankooda la jiro.




Rumaysadka Nexemyaah oo xamaasad geliyey dadkii loo ikmaday. Way ku raaceen, iyagoo leh “AAnnu dib u dhisno.” Nexemyaah wuxuu u sheegay qoys walba inay qayb ka mid ah derbiga ay dayac tiraan.




Laakin, qof walba ma ogola in dib loo dhiso derbiga. Nin la odhan jiray Sanballad, iyo labadiisii saaxiibba Toobiyaah iyo Geshem ma ay ahayn Yuhuudi. Ma ay doonaynin in gidaarka la dhiso, albaabadana la hagaajiyo.




Intii ay shaqada socotay, Sanballad baa aad u cadhooday. Isaga iyo saaxiibadii way ku jeesjeeseen Yuhuuddii. Toobiyah baa yidhi, "Waxa ay dhisayaan oo dhan xataa haddii dawaco fuusho way kala burburayaan." Nexemyaah uma jawaabin. Taa bedelkeeda, Ilaah buu ka baryay inuu la xisaabtamo iyaga.



Markii ay jeesjeeskoodii afxumada lahaa aysan saamayn ku yeelan weyday, waxay qorsheeyeen iyagoo midaysan ku dagaamaan wax ka gees ah Yerusalem, oo ay abuuranto rabsahdo badan inay ka sameeyaan.



Mar labaad, NexemyaahIlaah buu ka baryay caawimaad.  Oo weliba gaar buu ka ahaan jiray maalin iyo habeen ba si aysan waxba uga qaadan si layaab leh.



Yuhuuddii aad bay u shaqeeyeen, wayna welweleen. Qaar baa ka cabsaday in cadowgoodu u iman doono inuu iyaga laayo inta ay howsha ku jiraan. Wali, Nexemyaah ma uusn joojin mashruuca dhismaha. Wuxuu ilaalo dul dhigay shaqaalihii oo xusuuiyey iyaga in Ilaahay dhinacood la jiro oo uu ka awood badan yahay cadowga!



Nexemyaah wuxuu isku dayay inuu noqdo tusaale wacn oo ku dayasho leh.

Boqor Araxshasta wxuuu ka dhigay guddoomiyaha Yeruusalem xaqna u leh inuu dadka ka qaado karo lacag iyo raashinba.





Si adag buuna ugala
shaqeeyey dadkii
inay dib u dhisaan
derbiga.  Wuxuu
u isticmaalay
lacagtiisa inuu
raashin ugu iibiyo.

Ugu dambeyntii, dadkii way dhameeyeen derbigii, oo albaabadii baa lagu xidhayay iridda weyn. Markii Sanballat, Toobiyaah iyo Geshem kii Carabka ahaa maqleen inaysan jirin wax u dhaxeeya derbiyada, ayay qorsheeyeen inay dhib gaarsiiyaan Nexemyaah.



Farriin bay u direen Nexemyaah inuu kula kulmo iyaga meel la odhan jiray Ono.  Laakiin Nexemyaah wuu ogaa inay khiyaano la damacsan yihiin isaga inay magaalada kaga saarayaan si ay wax u gaarsiiyaan. Warqad buu u qoray oo uu ugu sheegayo iyaga inuusan ka soo baxayn shaqada oo uusan iyaga soo booqanaynin.




Ugu dambayntii derbigii wuu dhamaaday,
oo Nexemyaah wuxuu dhigay Ilaaliyayaal.


Oo weliba isagu wuxuu dhigay sharci odhanaya idahaha inaan la furi karin ilaa iyo si cad waaga u soo
baryo oo qoraxdu u soo muuqato mooyaane. Habeenkii oo idilna waa inay xidhnaadaan.

Iminka magaaladii waa meel nabdoon. Qurbajoog qaxooti Yuhuud ah ayaa dib ugu soo wada noqotay Yeruusaalem. Nexemyaah ayay u ahaatay inuu aad faraxsanaado inuu howshii Ilaah u dhiibay dhammaystiray. Oo uu ka soo gudbay wax ala wixii horjoogsady oo idil. Wuxuu joogay Yeruusaalem oo caawiyey dadkii, mar walbana wuxuu addeeci jiray Ilaah.



Darbigii Weynaa ee Nexemyaah

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Nexemyaah

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

35

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16